

Ardayda Dugsiga Sarre ee Jefferson Waxay Mareen Rooga Cas Markii ay Soo Bandhigeen Filim ay Sameeyeen Ka Hadlaya Nabadgelyadda.

Xarunta Waxbarashada ee Dr. Matthew Prophet, oo ah xarunta ay degan yihiin shaqaalaha maamulka Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay lahayd muuqaal ka duwan kii hore looga bartay fiidnimadii Isniintii markii ay martigaliyeen bandhiga dunida “The Return of Emergetron.” Munaasabadda rooga cas waxay ahayd dabaaldeegga filinka cusub ee ay ardaydu jilayaan iyo kuna saabsan xaalado badan oo ardaydu ay la kulmi karaan inta ay ku jiraan sanad-dugsiyedka caadiga ah.

Filimkani wuxuu ka soo maaxday maskaxda Bee Sloan, oo ah isku-xidhaha waaxda Nabadgelyada iyo Maareynta Degdega ah ee PPS. Sanadkii la soo dhaafay, waxay ka soo shaqeysay inay sameyso fiidiyaal tababaro ah dugsiyada dhexe iyo ardayda dugsiyada sarre oo ka hadlaya tallaabooyinka looga baahan yahay inay qaadaan marka loo tababarayo ama xaaladaha dhabta ah degdeg ah lix xaaladood suurtagal ah inay dhacaan: daad-gureynta, dhulgariirka, dhuumashada, kooxda Ka Jawaabta Arrimaha Degdega ah, Xaqijinta Nabadgelyada Dhismaha, iyo/ama lagama bixi karo/lama soo gali karo dhismaha.

Sloan fikradeedii ugu horeysay waxay ahayd, “Caruurtu kama heli doonaan fiidiyaha tababar dhaqameed. Caruurtu aad bay ugu caajii’s doonaan.” Sidaas awgeed waxay bilowday inay ku riyooto qoraal suurtagal ah oo noqon kara mid gaara oo ku filan in lagu taageero dareenka dhallinyaradda. Waxay isku taqaan qof aad aqoon dheer u leh farsamada teknoolajiyada cusub, waxay markii hore hambalyeyesay sheekada dhiirigalisay taariikhda Naimia, laakiin ka dib, maalintii ka horeysa Ciida Masiixiga, ayaa la gaadhay inaan la jecleysay Alfred Hitchcock.

Waxaanu sheeko wadaag ku yeelanay makhaayad qof aanan si fiican isku aqoon, kaliya waxaan ogaaday in ninka aan la sheekeysanayey uu ahaa Dan Coffey, oo ah madaxa Tiyaatarka Dugsiga Sarre ee Jefferson.

“Waxaan u sharxay waxaan rabay inaan sameeyo,” ayey tidhi Sloan. “Waxaan rabay inaan sameeyo muuqaal fiidiyow oo soo jiidasho leh oo ay caruurtu jeelaan doonto, iyo inaan dib u soo nooleeyo barnaamijkii Tiyaatarka Jefferson. Markii aan ka tegnay makhaayadda wuxuu si fiican u suureeyey ogaanshaha iyo suurtagan nimadda qaarkeed ee ay u ekaan kartaan. Waxaanu diray qoraalkeygii isaga oo dib u qoray, taasi oo ka dhigaysay mid aad uga sii wanaagsan habka, iyada oo aan bilownay duubista ka dib fasaxaydii.”

Aasaaska sheekadu wuxuu u dhignaa sidani: Wix, waa shaqaale cusub oo loogu talogalay Machadka Maareynta Waqtiga Khayaaliga ah, waxaan loo tababaray sida loo badbaadiyo tallaabooyinka la qaado xaaladaha degdega ah ee dugsiyada dadweynaha, kuwaasi oo si u kas ah u waxyeeleeyey qof xun ee sheekadda filimku ku socotay, Emergetron. Intii uu socday filimku, Wix wuxuu bartay sida loola tacaalo xaaladaha degdega ah wuxuuna noqday marba marka ka dambeysa hoggaamiye qeyb libaax ah ka qaatay kooxda.

Xubnaha ardayda ee jilayaasha ka midka ah –fasalada kow iyo tobnaad ee Jefferson Mekai Sillah, Taliyah Pratt, Montreal Brazile, Charlotte Saari, iyo Nalaya Thompson, iyo Ava Jones oo

ku jira fasalka 12naad – waxay duubeen muuqaalo muddo lix maalmood iyo labo waqt oo kala gedisan, habkaas waxaa u qaataay sabir fara badan iyo cunto fudud.

Sillah, wuxuu filmku ku jilayey lan, ayaa sheegay in waayo-aragnimada jilitaanka filinkan kooban ee leh xiiso gaar ah. “Waxay ahayd wax cususb xaqiiqdii sidoo kalena aad bay u fiicneyd in la barto habka waxbarashada oo dhan iyo sida muuqaladda loo sameeyo sababtoo ah jilitaanka shaashadda waxay aad uga duwan tahay mida lagu qabto tiyaatarka, taasi oo aan anigu caadiyan sameeyo.”

Filimka bilow ilaa dhammaad waxaa soo saaray PPS. Ma aha oo kaliya inay duubeen ardayda dugsiga Jefferson, macallimiinta, iyo shaqaalaha oo kaga qeybqaadanayey meelaha bannaan dheeraad ahaan, laakiin waxay soo bandhigeen waxqabadkii 2012 “The Lamentations of Jeremiah” ee kooxda hoboladda Dugsiga Sarre Cleveland oo uu la socda muusikadda Robin Stevens ee qalin-jabinta Dugsiga Cleveland sanadkii 20212.

Waxay ahayd rajadda Sloan in Soo Noqoshada Emergetron (“The Return of Emergetron”) taasi oo xusuusineysa da’ yarta kartidooda weyn ee aqoonta, adkeysiga, geesinimada, iyo xikmadda marka ay waajahayaan xaaladaha degdegga ah. Waxay sidoo kale rajeyneysaa in filimkaasi mala-awaalka ahi uu qaato jawaab degdegga ah taasi oo aan muddo dheer ka bixin maskaxda ardayda dadkii ka soo qeybqaatay inuu filimku hirgalo.

“Bandhiga farshaxanku wuxuu qeyb laxaadle ka qaataa aragtida cusub ee habka wax loo barto, taasi oo noo sheegeysa in dariiqyo badan oo dhinaca maskaxda ah, taasi oo ay u badan tahay inaad agabka xasuusnaato, “ayey tiri Sloan. “Sidaas darteed fiidiyowgani waxaa ku jira muusik; kaftan; sheeko, jilayaal iyo goobaha dhageystaasha uu ku xidhi doono; agab aad akhrido oo aad maqasho inta badan; iyo waxyaabaha ay metelayaan. Iyada tanina tahay mid xoojineysa dariiqada sheekada loo wariyo.”